# Hubinta Cuntada & Nafaqada


FSNAU
Qaybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya



Lasoo saaray
12aad 2009


## Warbixinta Saddex Biloodlaha-Fiiro gaar ah oo Dignin Hore Lagaga Bixnayo Xilliga deyrta


Cimilada
Suuqyada
Nafaqada
Beeraha
Xoolaha
Colaadda Sokeeye
Arrimaha Gobolladaee Soo Shaacbaxaya
Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada



FSNAU - Somalia
United Nations Somalia,
Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market,
Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146
/ 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org


### Natiijooyinka Ugu Muhiimsan

Waxaa la arkayaa caalamado sheegaya in ay soo hagaagayso guud ahaan xaalada sugnaanta cuntada ee hab-nololeedyada Soomaaliya, taas oo ay keentay hawlaha dalaga la beeray oo caadi ku soo noqday, xaalada daaqa oo fiicnaatay iyo helida biyaha oo soo hagaagtay taas oo ay keentay celceliska roobka deyrtii '09 oo noqday roobab caadi iyo kuwo ka sareeya. Marka guud ahaan la eego xilliga deyrta waxii ka danbeeyay, xaaladdu waxay u wanaagsan tahay beero-xoolo dhaqatada iyo dadka ku nool dhulka wabiyada ee Soomaaliya. Wax-soosaarka dalagga firileyda waxaa la filayaa in uu noqdo mid u dhow heerka caadiga koonfurta Soomaaliya, iyo sidoo kale dhulka digirta ee koonfurta iyo bartamaha wadanka. Mira goosashada beero-xoola dhaqatada Waqooyi Bari waxay u badan tahay in ay ka badato sidii hore loo saadaaliyay oo ahayd in ay ka hoosayn doonto heerka celceliska caadiga ah. Daadad yar yar ayaa ka dhacay meelo kooban oo koonfurta Soomaaliya ah xilligii Deyrta ayagoo sababay barakac kooban una keenay dallaga iyo hanti kaleba dhibaatooyin yar yar . Si kastaba ha ahaatee, waxyeelada daadadkaasi waa ay yaraayeen, Inkastoo meelaha qaarkood ee roobabka xooga lehi ka da,een ay kordhiyeen shaqa helida ayna sare u qaadeen qiimaha mushaarka ee hawl maalmeedyo beereed.


Xaalada xoolaha, ganacsiga iyo qiimaha xoolahuba way hagaageen, in kastoo qiimaha badarku hoos u dhacay wadanka intiisa badan, taas oo keentay in ay hagaagaan badeeco Isdhaafsiga Iyo awooda wax libsiga ee dadwaynaha Inta badan hab-nololeedyada. Qiimaha shillinka Soomaliga waxuu muujiyay caalamado in uu xoogaysanayo In kastoo qiima-dhaca uu weli aad u sareeyo marka loo eego heerarka sicir bararka ka hor. Si macno wayn leh, waxaa sii xumaaday amniga shacabka inta badan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya taas oo keentay barakac shacab, xanibaad dhaqdhaqaaqa dadka iyo badeecooyinka, curyaamiyayna hawlaha iyo bixinta kaalmada bani'aadminimo. Daraasado kal dhow lagu eegay xaaladaha nafaqo ayaa waxay muujiyeen dhibaato xag nafaq darro ba'an oo joogto ah oo ku daba dheeraatay gobolada Bartamaha (Galgaduud iyo Koonfurta Mudug) iyo Hiiraan, taas oo ifinaysa baahida loo qabo gargaar bani'aadanimo oo sii socda.

## Qodobada Muhiimka ah iyo digniinta hore ee Bilaha Jannaayo ilaa Juun 2010

- **Soosaarka Dallaga Firileyda ee laga Filayay in uu Caadiga u Dhawaado Si uu u iyoHormariyoHelida Cuntada ee Goballada Koonfureed.**

  Waxaa jira caalamado muujinaya in wax-soosaarka dallaga uu caadi noqon doono inta badan koonfurta Soomaaliya, taas oo ay sabab u tahay soo koboca dallaga la beeray oo wanaagsanayd. Xaalladan waxaan ka mid ahayn degmooyinka Kismaayo iyo Afmadow ee Jubbada hoose iyo sidoo kale qaybo ka mid ah gobolada Hiiraan iyo Bakool halkaas oo soo koboca dallaaga la beeray ay xumaatay sababo isku jira awgood (dagaallo sokeeye, celceliska roobabka oo hooseeyay, iwm.). Intaas waxaa dheer, guud ahaan dhulka inta lagu tabcay dallagayada xitaa waa ay korodhay. Ayadoo ay ugu wacan tahay wax-soosaarka xilli beereedyada ka dib oo fiicnaa iyo rajada wax soo saar ee xilliga deyrta oo wanaagsanaa, dallaga firileyda (badarka) ee suuqa la keenayo waa kordhay, waxayna sababtay in qiimaha badarku hoos u dhaco dhulka intiisa badan.

  Suuq geynta dallaga firileyda ee koonfurta Soomaaliya ayaa la filayaa in uu sii kordho xilliga Deyrta ka dib, marka laga reebo beero-xoolo dhaqatada Jubbada hoose, Gedo, Bakool iyo qaybo ka mid ah Shabeelada Dhexe. Meelaha suuqgeynta dalagga firileydu ay hooseyso waxaa ku yar kaydka firileyda marka laga soo bilaabo xilligii Guga ee '09




Qaab Xilliyeedka Soomaaliya & Dhacdooyinka Muhiimka ah

oo xumaa, waxayna u badan tahay in dhaqdhaqaaqa suuqyada uu hakad ku dhaco maadaama ay nabadgelyada meelahaasi ay xun tahay. Fursadaha qarash soo gelida iyo qiimaha mushaarka ee hawl maalmeeyada ayaa soo hagaagay waxaana ugu wacan dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha beeraha oo xoogaystay, taas oo horseedday hagaagidda iswaydaarsiga ama isdhaafsashada ganacsiga iyo awooda wax iibsiga dadka ku nool koonfurta waddanka marka laga reebo dhulka masagadu ka baxdo (marka Baay lagu daro). Waxaa la qiyaasayaa tirada guud ee dadka dhibaataysan ee koonfurta in ay hoos u dhici doonto.

- **Xaaladda Deg degga Bani-aadminimo ee sii Xumaanaysa ee Gobolada Dhexe iyo Hiiraan.**
  Roobabka deyrtu waa ay ku hooseeyeen goobaha xoolo dhaqatada ee Hawd iyo Cadduun ee gobollada Hiiraan iyo Galgaduud, taasoo sababtay xaaladdii ugu xumayd ee xagga daaqa iyo biyaha ee Soomaaliya. Xaaladda magoolka iyo daaqa waa ay xuntahay marka la eego dhulka xeebta ee deexda Galgaduud iyo sidoo kale qaybo ka mid ah dhulka beero-xoolo dhaqatada Hiiraan (degmooyinka Jalaqsi iyo Buulo-Burte). Goobahan ayaa ku sugan xilligii lixaad ee abaaro isdabajoog ah. Xaaladaha nololeed ee qaybo ka mid ah dhulka xoolo-beero dhaqatada ee Hiiraan iyo sidoo kale dhulka digirta ka baxdo ee bartamaha Soomaaliya ayaa soo hagaagaysa, sababtoo ah roobka caadiga ah ee da'ay oo keenay in tacabka iyo waxsoosaarka dallaga in ay heer caadi ku soo dhawaadaan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan in dhulkaasi uu abaar ahaa muddo shan xilli oo isdaba joog ah; xaalladan sii hagaagaysana looma tarjuman karo in nolosha dhulkani uu dhaqso us soo kabsanayo. Dadwaynuhuna aad bay u qaamaysan yihiin aydoo ay xaaladda is-caawimmada dadkuna aysan isbixinaynin oo ay xumaatay. Gobolladan waxaa ku sugan barakacayaal aad u tira badan ayna ugu wacan tahay xaalado abaaro iyo nabadgelyo xummo, iyadoo kooxo ka mid ahi ay noqdeen dad sabool ah markii ay xoolihii ka dhamaadeen, ayna u hayaameen magaalooyinka ayagoo raadinaya kaalmo iyo shaqo intuba. Si kastaba arintu ha ahaatee, dadka ku dhaqan nawaaxigaas dhibaatadoodu waa ay sii soconaysaa muddada dhow, waxayna ku qaadanaysaa inay soo kabtaan dhowr xilli roobaadyo caadi ah oo da'a.

- **Hoos u Dhaca Abaaraha iyo Ifafaale Hagaag ee Dhulka Waqooyiga**
  Dhanka waqooyiga dalka, roobabku waxay ahaayeen kuwa yara xooggan si balaaranna ugu baahsan meelaha abaaruhu ka jireen ee dhulka banka Sool ee gobollada Sool iyo Sanaag. Roobabka da'ay waxay ahayeen kuwa celcelis ahaan ku wanaagsan qaybo badan oo ka mid ah waqooyiga, xooluhuna waxay billaabeen in ay soo kabtaan khaasatan gobolada Sool, bariga Sanaag iyo qaybo ka mid ah gobolkaNugaal. Biyo dhaamiskii dhulkaasi ka socday waa uu istaagay, qiimaha biyuhuna hoos ayay u dhaceen. Meelaha roobku uu iska fiicnaa, rimida geela waxay ku bilaabatay heer hoose waxaana la filayaa in ay sare u kacdo bisha 12aad '09. Si kastaba ha ahatee, xoolaha wax-soosaarkooda iyo dhaliddooduba waa hoosaysaa sababta oo ah rimida xoolaha oo hoosaysay xilligii Jilaalka '09 intii lagu jiray, iyo sidoo kale cudurada xoolaha intii lagu jiray Xagaagii '09 kaas oo u keenay dhimasho iyo dhicin geela iyo arigaba leh. Qaadista xayiraaddii dhoofinta xoolaha ayaa waxuu keenayaa in ay sii korodho iibka xoolaha iyo sidoo kale fursado shaqo helid ayna ugu wacan tahay dalabka xooggan oo dhinaca xoolaha ah oo sii maraya dekadaha Berbera iyo Boosaaso.

- **Hoos u Dhaca Qiimaha Cuntada iyo soo Hagaagga Sugnaanshaha Cunto Helidda ee Magaalooyinka**
  Falanqayn dhawayd oo laga sameeyay sugnaanta cuntada ee magaalooyinka ayaa waxay muujinaysaa helidda cuntada ee dadka magaalooyinka ku dhaqan inay soo hagaagayso marka laga soo bilaabo bishii 6aad '09, sababtoo ah qiimaha badarka oo hoos u dhacay iyo kororka Qiimaha ugu Yar ee Qarashka Danbiisha ku baxa (QYQD). Celcelis ahaan xilliga Deyr-ta ee '09/10 waxuu wanaajin doonaa wax-soosaarka dalagga firileyda, taas oo horseedi doonta oollidda kayd cunto, qiimaha dalagga firileyda oo hoos u sii dhaca, iscaawimida dadka gudohooda ah iyo hoos u dhac ku yimaada QYQD. Marka loo eego bishii 10aad ee sanadkii hore, daraasad lagu sameeyay QYQD waxay mar hore muujisay oo mudan in la xuso hoos u dhac qiime, inta u dhaxaysa 9-30% waddanka oo idil, taasoo tilmaamaysa hoos u dhac ku yimid waxyeelladii uu keenay sicir bararku. Sidoo kale, qiimaha Shilinka Soomaaliga kor ayuu u kacay illaa iyo sanadkii hore, sababtuna waxay u badan tahay in ay tahay kororka ku yimi dhoofinta xoolaha. Qiimaha badeecadaha la soo dhoofiyo waxay u eg tahay in ay hoos u dhaci doonto iyadoo soo dejinta badeecaduhu ay korortay taas oo ay keentay koror dakhliga laga helayo dhoofinta xoolaha iyo ayadoo la qaaday xanibaadihii dhoofinta xoolaha Soomalida ee loo dhoofiyo waddanka Sucuudiga. Si kastaba ha ahaatee, caalamadahaas wanaagsan ee horumarka ah ma muujinayso loollanka barakacayaashu ay ugu jiraan fursad shaqo u helista iyo iscaawimmada bulshada dhexdeeda ah.

- **Koritaanka Tirada Barakacayaasha iyo Hoos u Dhaca Kaalmooyinka Bani'aadminimo**
  Tirada barakacayaasha ayaa sii kordhaysa sababta koowaadna ay tahay sii kororka ammaan darrida ka jirta koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Abaaruhu waxay sii xumeeyeen xaaladaha nololeed ee barakacayaasha ku dhaqan gobolada dhexe. Tirada guud ee barakacayaasha ayaa korodhay ilaa 63,000 oo qof saddexdii bilood ee la soo dhaafay oo kaliya, boqolkiiba 40 oo barakacayaasha ahna waxa ay ka yimaadeen magaalada Mugadisho. Tirada goobaha xuddunta u ah nabadgelyo darrida bilahaan dambe, oo markii hore ku koobnaa oo keliya Muqdisho iyo inta ku wareeegsan, ayaa hadda ku sii fidday meelo kala duwan oo waddanka gudihiisa ah. Iska hor imaadyadani ayaa keenay dhaawacyo loo gaystay dad, taccaddiyo, jidgooyooyin isdaba joog ah, xayiraado xagga dhaqdhaqaaqyada ganacsiga ah, iyo sidoo kale xannibaadyo ku yimi dhaqdhaqaaqa dadka iyo badeecooyinkaba. Xaaladda siyaasadeed oo aan la hubin awgeed, barakac dad oo hor leh ayaa la filayaa bilaha soo socda. Xaaladaha ayaa la filayaa in ay ka sii dari doonaan sababo la xiriira hoos u dhaca ku yimi kaalmada bani aadminimo iyo kororka nacaybka loo qabo barakacayaasha, khaasatan gobollada Puntland. FSNAU waxay samayn doontaa sahanno deg deg ah oo ku aaddan barakacayaasha waqtiga soo socda ee daraassada xilliga Deyrta ka dib.

## WARBIXINTA QAYBAHA

### CIMILADA

***Roobabkii Da'ay Xilliga Deyrta***

Roobabka Deyrta meelaha ay ka da'een iyo waqtiga ay ka da'een gobollada iyo hab-nololeeedyada Soomaaliya oo idil waa ay kala duwanaayeen. Waqooyiga iyo qaybo ka mid ah bartamaha waddanka, roobabku waxay bilowdeen dhamaadkii bishii 9aad waa ayna sii socdeen ilaa bartamaha bishii 10aad, inkastoo wax roob ahi uusan di'in bishii 11aad. Badanaaba gobolada koonfureed ma aysan helin roobab bishii 9aad, inkastoo roobabku ay sii da'ayeen siina fidayeen bishi 10aad laakiin waxa ay ka joogsadeen horraantii bishii 11aad dhamaan meelaha hab-nololeedyada ee waddanka oo idil. Akhbaaraadka ka imanaya gudaha waddanka, si kastaba ha ahaatee, waxay sheegayaan in roobabku ka billaabmeen qaybo ka mid ah koonfurta illaa billowgi bisha 12aad.

Dhanka waqooyiga, roobabka xooggoodu waa ay fiicnaayeen (25-75mm) ayagoo aad ugu baahay dhulka Golis Guban, qaybo ka mid ah Sanaag, iyo Nugaal, waxayna kaloo si dhex dhexaad ah ugu baaheen hab-nololeedka Hawd. Si kastaba ha ahaatee, roobab yar ayaa ka da'ay inta badan qaybo ka mid ah dhulka xeebta ee deexda ah, qaybo ka mid ah Dharoor iyo hab-nololeedka Gaagaab, iyo sidoo kale hab-nololeedka Cadduun ee degmada Jarriiban ee gobolka Mudug. Marka loo eego xog roobeedka muddada dheer la ururiyey (Celceliska Muddada Fog) roobabku waxay ahayeen kuwa la mid ah celceliska meelo badan oo waqooyiga ka mid ah, halka ay ahaayeen roobab caadi ah 20-60% oo kelya inta badan dhulka Deex xeebeedka ah, Hawdka Togdheer iyo qaybo ka mid ah gobolka Sanaag (Khariidada 1). Roobabka Xayska ayaa wali la filayaa in ay ka da'aan dhulka xeebaha bisha 12aad gudeheeda.


Xilliga deyrta ee sanadkan '09 roobabku siyaabo kala duwan ayay uga da'een dhulka abaaruhu wax yeelleeyeen ee gobollada dhexe ee galgaduud iyo Mudug. Roobab ku dhaw caadiga amaba roobab caadi ah ayaa ka da'ay dhulka digirtu ka baxdo, iyo qaybo yar oo ka mid ah dhulka xoolalayda Caduunka iyo qaybo ka mid ah dhulka xeebta ee Deexda. Hase ahaatee, roobabku aad bay ugu yarayeen degmooyinka Cadaado, Dhuusamareeb iyo Caabud-waaq, meelo yar oo ka mid ha dhulka digirtu ka baxdo iyo qaybo ka mid ah dhulka xeebeedka Deexda. Marka la is bar bar dhigo roobabka da'ay bilaha 10aad iyo 11aad ee xilliga dayrtan iyo kuwa celceliska muddada dheer (LTM) waxay muujinayaan in roobabka xilligan Deyrta ay yihii roobab caadi ah ama kuwo ka sarreeya heerka caadiga inta kale ee gobollada bartamaha Soomaaliya. Tusaale marka laga soo qaato, macluumaadka xarumaha roob-beegayaasha Buulo-Berde iyo Belet-Wayne waxay qoreen 153 mm iyo 271 mm roobabkii da,ay bishii 10aad, kuwaas oo ahaa 177% iyo 300% ee heerka celceliska muddada dheer (LTM), siday isugu xigaan. Si kastaba ha ahaatee, roobabku waa ay ka hooseeyeen marka loo eego celceliska roobka ee waqtiga fog (LTM) labada meeloodba inta lugu jiray bishii 11aad (43% ee roobabka celcelska xilliga fog ayaa laga helay Buulo-Berde halka Belet-wayne-na laga helay 63% celceliska roobka waqtiga dheer 63%).

Dhulka koonfurta, roobabku waxay ahaayeen kuwo caadi ah amaba caadiga ka sarreeya marka laga reebo qaybo ka mid ah dhulka xoolalayda ee Hawdka Hiiraan, qaybo ka mid ah koonfurta beero-xoolo dhaqatada iyo dhulka wabiga ee Buulo-Berde iyo Jalaqsi (Hiiraan), qaybo ka mid ah Ceel-berde (Bakool) iyo koonfurta Garbahaarray (Gedo). Roobabka Deyrtu waa ay xumaayeen dhulalkaas oo dhan intii lagu jiray xilliga Deyrta. Intii lagu jiray xilliga bishii 10aad iyo 11aad, waxaa ka da,ay roobab waawayn oo daadad wata qaybo ka mid ah Hiiraan, Gedo, Shabeelooyinka iyo Jubbooyinka. Si kastaba ha ahaatee, roobakii El-niinada ee la filaayay inay sababaan roobab xoog leh iyo daadadba ma aysan da'in.

***Xaalada Dhirta iyo Xaabka***


Xilliga Deyrta waxaa lagu yaqaanay xaalada dhirtu in ay fiicanaato sababta oo ah roobabka da'aya bilaha 9aad illaa 11aad. Habxisaabeedka ama tusaha kala duwanaanshaha muuqaalka dhirta ee caadiga ah (HDDHC) ee tobankii beriba mar soo baxa, 10ka bari ee ugu horeysa bisha 12aad waxay muujinaysaa in xaalada daaqsintu ay wanaagsan tahay inta badan dhulka gobolada koonfurta iyo bartamaha ayna xun tahay dhulka hab-nololeedyad beero-xoolo dhaqatada ee gobollada Bakool, Gedo, Hiiraan iyo sidoo kale dhulka xeebta ee Deexda ee Shabeelada Dhexe iyo Galgaduud. Dhanka gobollada Waqooyiga, daaqu waa u caadi dhulka Golis Guban, qaybo Sanaag ka mid ah iyo Nugaal, inkastoo hab-nololeedka xoolalayda Karkaar-Dharoor ee gobolka Sanaag iyo sidoo kale xoolalayda Galbeedka Golis ee Togdheer laga arkaayo in xaaladda daaqu ay sidi hore ka sii fiicnaanayso marka loo fiirsho hab-nololeedyada ku agwareegsan (eeg khariida 2).

**Khariidada 1: Boqolkiiba Roobabka Caadiga ee Da'ay (Bishii 9aad illaa 10ka Beri ee hore eeBisha 12aad ee '09)**




Source: NOAA

**Khariidada 2: NDVI Tobanka Beri ee Hore ee Bisha 12aad)**




Source: JRC/MARS FOOD

## SOOMALIYA: DAADAKII *DEYRTA* '09/10

Xilligii u dhaxeeyay inta lagu jiray bilaha 11aad iyo 12aad, ee '09, koonfurta Soomaaliya waxaa ka dhacay daadad yar yar khaasatan meelaha biyo qabatinka ah ee gobollada Shabellooyinka iyo Jubbooyinka, roobab badan oo da'ay awgood. Roobabkani ayaa sababay xaalado El-niino aan xoogganayn oo ka jiray geeska afrika oo ku soo aaday xilligaan Deyrta ah, amaba Deyrta (inta u dhaxaysa bilaha 9aad iyo 12aad ee 2009), taasoo uu xaqiijiyey urur goboladeedka IGAD qaybtiisa saadaasha hawada (ICPAC). Daadadka yar yar ee goosgooska aha waxay sababeen barakac waqti kooban ah iyo iyagoo khasaaroyin yar oo ay u gaysteen dalaggii baxayay iyo hanti kaleba, meelo cayiman oo koonfurta Soomaaliya ka mid ah. Si kastaba ha ahaatee waxyeelada daadadku ma aysan weynayn.

Intii lagu jiray bishii 10aad ee 2009, FSNAU, FEWSNET, iyo SWALIM, waxay ka wada shaqeeyeen in ay sameeyaan Kooxda qaabilsan Xogta Daadadka, si loo ogaado xiliga daadadka iyo xogtooda, loona qiimeeyo waxyeeladada daadadku ay geysteen. SWALIM (Maaraynta Xogta Dhulka iyo Biyaha ee Soomaliya) ayaa waxay bixinaysay xogta heerarka ay daadadku marayaan maadaama ay hesho xogta ka digidda daadadka sitimaankii ama bishiiba mar ayna ka hesho xogta kooxda isku dhafka ah ee qaabilsan ka jawaabista dhibaatooyinka. Xog badan oo arrintani ku saabsan waxaa laga heli karayaa websaytka oo hay,ada SWALIM ay leedahay ee (http://www.faoswalim.org/subsites/frrmis/index.php).

| Dhulka Wabiyada | Gobolka/Degmada | Tirada dadwaynaha Barakacay ilaa bishii 10aad '09 | Dhibaatada Daadadku Gaysteen |
|---|---|---|---|
| Dhulka Wabiga Shabeele 14,320 Barakacayaal ah | **Gobolka Hiran** | **13,000** | |
| | Belet Weyne/Matabaan | 13,000 | Barakac; Beero Daad galay, dalag baaba'ay; Musqulo dumay |
| | Bulo Burte/Maxaas | - | Barakact |
| | Jalalaqsi | | Beero biyo galeen |
| | **Gobolka Shabeellada Dhexe** | **120** | |
| | Jowhar/Mahaddaay | | Beero biyo galeen |
| | Balcad/Warsheekh | 120 | Barakac; beero biyo galeen |
| | **Gobolka Shabeelada Hoose** | **1,200** | |
| | Marka | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Qoryooley | 300 | Barakac; Beero biyo galeen |
| | Kurtunwaarey | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Wanlaweyne | 900 | Barakac; Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Sablaale | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Baraawe | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| Dhulka Wabiga Juba 2,990 Barakacayaal ah | **Gobolka Gedo** | **2,100** | |
| | Ceel Waaq | 2,100 | Barakac |
| | **Gobolka Jubbada Dhexe** | **890** | |
| | Jilib | 850 | Barakac; Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Bu'aale | 40 | Barakac; Beero biyo galeen,Dalag baaba,ay |
| | Saakow/Salagle | | |
| | **Gobolka Jubbada Hoose** | **0** | |
| | Jammaame | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | Kismaayo | | Beero biyo galeen, Dalag baaba'ay |
| | **Wadarta Guud** | **17,310** | |

Roobabka Deyrtu waxay ka bilowdeen dabayaaqadii bisha 9aad dhulka waqooyiga iyo bartamaha Soomaaliya, halka roobab baahay ay ka da,een meelaha biyo qabatinka leh ee wabiyada Jubba iyo shabeelle sitimaankii labaad ee bishii 10aad. Roobab badan oo ka da'ay buuralayda Itoobiya isla xilligaas ayaa waxay noqdeen kuwo kordhiya heerka biyaha labada wabi dabayaaqadii bishii 10aad iyo horraantii bishii 11ad. Dhibaatooyinka fatahaadda wabigu keeni karo waa ay yarayd bilowgii bishii 10aad, waxayna isu bedeleen kuwo leh khasaare heer caadi ah dhamaadkii isla bishii 10aad. Marka la tixgeliyo heerka nuglaanta biyo celis ee wabiyada iyo jambiyada bur buray waxaa jira walaac fatahaad oo dhici kara. Si kastaba ha ahaatee, heerka wabigu waxuu taagnaa qarka wabiga xilliga Deyrta oo dhan. Ha yeeshee, waqtigii dhamaadka bishii 10aad iyo bilowgii bishii 12aad, roobab badan oo ka da,ay dhulal kooban ayaa waxay keeneen daadad yar yar dhulkaaso ay ka mid ahayeen 11 degmo ee gobolada Hiiraan, Shabeelle iyo Jubbooyinka, iyo sidoo kale gobolka Gedo. Xogtaasina waxaa xaqiijiyay Kooxda Xogta Daadadka qaabbilsan.

Waxyaabaha ugu waaweyn ee ay daadakaasi gaysteen waxaa ka mid ah barakac dadwayne, dalaggi taagnaa oo biyo ku fatahmeen, ayagoonna waxyeelleeyay dallaga. Heerka barakacu waa ka hooseeyay marka loo fiirsho sanad-kii 2006, ayadoo tirada barakacayaashu ay gaareen 17,310 oo qof dhamaan gobollada dalka oo dhan ah. Waxaana laga barkacay 7 degmo 11kii degmo ee daadadku waxyeelleeyeen, iyadoo Belet-Wayne (Hiiran) oo kaliya ay ka barakaceen 75% tirada guud ee dadwaynaha barakacay.


In kastoo la filanayay xilli roob wanaagsan, xilligii jilaalka ee dheeraa ayaa waxuu bilowday bartamaha bishii 11aad wadanka oo dhan, waxa uuna ka sii socdaa qaybo ka mid ah dalka (koonfurta Hiiraan iyo inta badan gobollada dhexe ee Soomaaliya). Calamadihii curashada roobabka oo sii yaraanayay ayaa sababay roobab liita waxaana roobab yar yar laga soo sheegayaa agagaarka dhulka webiyada Shabeelle iyo Jubba dhamaadka bishii 11aaad. Xaaladaha roob la'aaneed awgeed iyo filid la'aan daadad ka yimaada wabiyada ayaa sababay in dadka barakacay u noqdeen guryahoodii maadaama biyihii ay ka gureen.

## COLAADA SOKEEYE

Xaaladda colaadda sokeeye waa ay ka sii daraysaa meelo badan oo koonfurta iyo bartamaha soomaliya ka mid ah. Maleeshiyooyin is abaabulaya, dagaalo goos-goos aha iyo iska hor-imaadyo ayaa sii kordhaya. Sidoo kale meelaha xudunta u ah ammaan darrada ayaa sii siyaadaya. Intii lagu jiray labadii bilood ee u danbaysay waxaa ammaan darrada shacabka laga soo sheegayaa Muqdisho Boosaaso (Bari), Gaalkacyo (Mudug), Balcad (Middle Shabeele), Rabdhuure (Bakool), Afmadow iyo Kismaayo (Jubbada Hoose). Dhacdooyinkaasi waxay keeneen waxyeeelo bani'aadminimo, sida tacaddi bani'aadminimo joogto ah, jidgooyooyin is daba yaala, xannibaadyo ku yimi dhaqdhaqaaqyadii ganacsi, iyo sidoo kale xannibaad xagga isu socodka dadka iyo badeecooyinkaba.

Arinta ugu mudan in la xuso ayaa waxa tahay koror dhaqdhaqaaqa maleeshiyada oo laga soo sheegay degmooyinka Afmadow (Jubbada hoose), Belet-Wayne (Hiiraan), Balcad (Shabeellada Dhexe), Ceelberde, Rabdhuure iyo Xuddur (Bakool), Guryoceel (Galgaduud) iyo Muqdisho. Iska hor-imaadyada la xiriira dagaallada manaafacaadka iyo kala aarsi qabiileed ayaa waxa la soo sheegayaa in ay yaraadeen. Ha yeeshee, dagaallada sokeeye ayaa sare u kacayaan gobollada waqooyiga (degmooyinka Gabillay iyo ee gobolada Waqooyi Galbeed iyo Awdal) inkastoo aysan carqaladayn ku samaynin shaqooyinka la xiriira samafalka bani'aadminimo. Dhowaan ayaa waxaa Boosaaso (Waqooyi Bari) laga soo sheegay dhowr meelood oo bambooyin lagu qarxiyay oo lagu bar tilmaameedsanayo maamulka halkaa ka jira. Hase yeeshee illaa iyo hadda qofna ma sheegan masuuliyadda weerraradaasi.


**Khariidada 3: Gaarista iyo Hawlgallada Hey'adaha Samafal ee Bisha 10aad 2009**




OCHA Somalia - Humanitarian Access Update (October '09)

Dhacdooyinka burcad badeednimada ayaa sii socota sida la soo sheegay xilligii warbixintan la ururninay amaba la qorayay inkastoo iska caabbin iyo xabsi dhigid boqollaal burcad badeed ah oo ay xireen ciidamada wadammo kala duwan (25 wadan). Waxaa la soo sheegay, in 26 markab ay weerareen burcad badeeddu intii u dhaxaysay bilihii 6aad Iyo 11aad. ee '09. Marka laga reebo 12 markab oo la afduubay, 2 markab iyo 59 shaqaalihii maraakiibtaas ayaa la sii daayay ka dib markay baxsheen madaxfurasho.

**Jaantuska 1: Dhibaatooyinka ku Dhaca Hay'adaha Samafalka ee Bil Walba iyo Gobol Kasta.**




Source: OCHA Somalia - Humanitarian Access Update (October '09).

In lagu qiyaasay saddex meelood laba meel degmooyinka Soomaaliya gargargaarka bani aadminimada waa laga fulin kari waayey, taas oo sii adkaysay bixinta deeqda iyo caawimada dadka baahan (khariidada 3). Lama soo sheegin afduub iyo dil loo gaystay shaqaalaha samafalka illaa iyo bishii 9aad, taasoo ay ugu wacan tahay tirada shaqaalaha samafal oo xadidan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Hase ahaatee, wali waxaa lagu haystaa Soomaliya gudeheeda 10 qof shaqaalaha gargaarka bani'aadanminimada ka shaqaynayay oo la afduubtay sanaddii 2008. (Sawirka 1).

### *Dadka Barakacay*

Sida ay sheegayso warbixintii ugu danbaysay (bishii 12aad ee2009) ee UNHCR (Hayadda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay) ee la socodka barakaca dadka, in ku dhow 63,000 oo qof ayaa ka barakacay waddanka oo dhan ilaa iyo bilowgii bishii 12aad. Ilaa iyo afartan iyo saddex boqolkiiba (ama 27,000) oo barakacayaal ah ayaa Muqdisho ka yimid, shantii qof ee barakacay mid ka mid ah Muqdisho gudaheeda ayuu ku barakacsan yahay. Meelaha muhiimka ah ee ay barakacayaashu joogaan waxaa ka mid ah gobollada Galgaduud, Jubbooyinka iyo Shabaeellada hoose. Meelaha ay barakacayaashaas kala aadeen ayaa ah ceelasha biyaha iyo Muqdisho, magaalooyinka Gaalkacyo iyo Boosaaso ee Puntland, iyo sidoo kale Ceelbuur iyo Dhuusa mareeb oo ka mid ah gobolka Galgaduud.

Afar meelood sadex meel sababaha loo qaxay ayaa la xiriirta ammaan darro iyo abaaro, iyadoo ammaan darrada shacabku ay tahay mida ugu muhiimsan ee keentay barakaca (63% dhacdooyinka). Waxyaalaha kale ee keenay barakaca waa qofkii oo waxii noloshiisu ku tiirsanad ay ka baaba'day (6.6%) iyo daadad (5.7%), khaas ahaan qaybaha wabiga ee gobolada Hiiraan iyo Jubbooyinka. Intaas waxaa dheer, waxaa jira cadaawad sii kordhaysa oo u dhaxaysa dadka degaanka iyo barakacayaasha ka yimid koonfurta Soomaaliya sababaha amaan darrro ee ka dhacay Boosaaso ee aan kor ku soo sheegnay awgood. Taasi waxay keeni kartaa barakac cusub oo barakacayaashu u soo hayaamaan gobolada dhexe iyo koonfurta Soomaaliya. Sababo la xiriira hubid la'aan xagga xaaladaha siyaasadeed, hayaan cusub oo baracayaal ah ayaa la filan karayaa bilaha soo socda.

**BEERAHA**

***Soo Koboca Dallaga iyo Wax Soosaarka***

Guud ahaan xilligaan Deyrta soo koboca dalaggu waxuu ku dhowaa heer caadi ah inta badan koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, marka lagu daro Jubbooyinka, Baay, Gedo, Shabeeellooyinka, iyo qaybo ka mid ah Bakool iyo Hiiraan, iyo sidoo kale dhulka digirtu ka baxdo ee Shabeelada dhexe, Galgaduud iyo Mudug. Taa waxaa ka duwan soo koboc dalag oo liidata ayaa laga soo sheegayaa qaybo ka mid ah Buulo-Berde iyo Jalaqsi (Hiiraan), iyo sidoo kale Kismaayo iyo afmadow (Jubbada hoose) sababtuna ay tahay roobabka oo ka hooseeya heerka celceliska mudada fog, daadad qafiif ah, waxyeelo caws (qaybo ka mid ah Hiiraan iyo Jubbada hoose) iyo sidoo kale xaalad ammaan xumo shacab (qaasatan Jubbada hoose). Gobollada badankood waxay soo mareen Jiilaal dheer oo ku dhow 30 maalmood intii lagu jiray bisha 11aad, taas oo abuurtay walaac in soo koboca dalagyada ay waxyeelleyso haddii roob yaridu sii socdo ilaa iyo dhamaadka xilliga Deyrta. Si kastaba ha ahaatee, bilowgii bisha 12aad waxaa roobab dhex dhexaad ahi ka bilowdeen qaybo ka mid ah gobollada Shabeellooyinka, Jubbooyinka, Gedo, Baay iyo meelo Bakool Iyo Hiiraan ka mid ah. FSNAU ayaa si joogto ah ula soconaysa sida ay roobabku u da'ayaan illaa iyo inta ay ka dhamaanayso bisha 12aad.




*Delega Sinsinta oo si Wanaagsan u Kobcay, Bu,aale, Jubbada Dhexe, Bishii 11aad, '09.*

Marka la eego warbixinnada ka imaanaya dalka gudihiisa, waxaa la qiyaasayaa wax-soosaarka dallaga firileyda in uu ku dhawaado heerarka caadiga koonfurta Soomaaliya. Xilliga soo socda ee mira gurashada digirta ayaa sidoo kale u eg in ay u dhawaanayso heerka caadiga ah. Xogta ka imaanaysa gudaha dalka waxay sheegaysaa dhulka la beeray in uu kordhay maadaama beeralaydu ka faa'idaysteen roobabkii Deyrta oo si fiican u bilowday. Taas waxaa sii dheer, barakacayaashii ka cararay dagaallada sokeeye ayaa ka qayb qaatay shaqooyinka beeraha. Xilligaan, dhul wayn ayaa laga beeray dalaga sinsinta dhul beereedka roobabka ku baxa iyo dhulka wabiyadaba sababtuna ay tahay qiimaha sinsinta oo kor u kacay iyo ayadoo ay korodhay dhoofinteedu. Dhulka beero-xoolo dhaqatada ee gobolada Awdal, Waqooyiga Galbeed iyo Togdheer ee goboladda Galbeedka ayaa waxaa la saadaaliyay xilligii ka dambeeyay Gu' '09 dalagga soo go'aya in uu yaraan doono taas oo ay u sabab tahay roobkii Gu'ga oo caadiga ka hooseeyay. Hase yeeshee , roobabkii Karanta ee la helay xilligii dabayaaqadii bilaha 7aad iyo 8aad ee '09` ayaa hagaajiyay xaaladda dalagga gobollada Awdal iyo Waqooyi Galbeed wax soo-saarkuna waxay u egtahay in uu ka badan doono sida hore loo saadaaliyay, laakiin ilaa hadda wax-soo saarka waa uu ka hooseeyaa heerka celceliska caadiga. FSNAU iyo hay'adaha kale ee ay wada shaqeeyaan waxay samayn doonaan sahammo ka danbaysa xilliga mira gurashada (beero goosashada) ee inta xilliga Guga/Karanta lagu jiro bisha 12aad ee 2009.

***Qiimaha Firileyda***

Qiimaha gallayda iyo masagada si wayn bay ugu kala duwan yihiin suuqyada waawayn ee koonfurta Soomaaliya. Qiima dhac gaaraya illaa 10-25% ee gallayda dalka laga soo saaro Iyo masagada ayaa laga diiwaan geliyay inta u dhaxaysay bilaha 7aad iyo 11aad gobollada Shabeellooyinka, Baay, iyo dhulka wabiyada ee Jubbooyinka. Jammaame waxaa lagu arkay hoos u dhac daran, halkaasoo qiimaha gallayda isla waqtigaan oo kale uu hoos u dhacay illaa 57% (asagoo ka soo dhacay 7,500 Sosh kiiladii una soo dhacay 3,200 SoSh). Qiima dhacaas waxaa keenay suuqa oo aad loo keenay gallayda ayadoo laga cararayo xilliga beerista Deyrta '09 oo wanaagsan, xanibaadyada jidadka oo yaraaday (qaasatan gobolada Shabeellooyinka, Baay iyo qaybo ka mid ah Jubbooyinka) iyo deganaanshaha Shillinka Soomaaliga marka la barbardhigo Doolarka. Si kastaba ha ahaatee, qiimaha gallayda iyo masagada ee suuqyada koonfurta ayaa wali waxay sarreeyaan 120% ilaa 230% marka la barbardhigo celceliska shanta sanno oo bisha 11aad (2004-2008). Qiimihii ugu hooseeyay ee gallayda inta lagu jiray bishii 11aad ee '09 (3,000-5,000SoSh/kg) waxaa laga diiwaan geliyay hab-nololeedka wabiga ee Jamaame (Jubbada hoose), Jilib iyo Bu,aale (Jubbada dhexe), Afgooye, Marka iyo Qoryooley (Shabeellada hoose) sababtuna ay tahay roobka Guga '09 iyo wax-soosaarka gallayda aan xilliga lahayn oo fiicnaa. Halka laga qoray qimaha ugu sareeeya gallayda (12,000-14,000 SoSh/kg) suuqyada waawayn ee hab-nololeedka xooolaha ee Dhoobley, Afmadow Iyo Xagar (Jubbada hoose), sababtuna ay tahay fogaanta iyo qiimaha gaadiidka oo sarreeya, wax-soosaarka badarka oo xumaa xilligii Gugii '09, iyo sidoo kale jid gooyo ay keentay iska hor imaadyada ka dhacay Afmadow iyo Badhaadhe (Sawirka 2).

**Jaantuska 2: Isbedbedelka Qiimaha Firileyda Heer Gobol (SoSh).**





Qiimaha masagada ee bishii 11aad '09 waxay ahaayeen kuwa aad ugu hooseeya (3,500 SoSh ilaa 4,500 SoSh/kg) suuqyada waawayn ee gobolka Baay (Baydhabo, Qansaxdheere, iyo Diinsoor), iyo sidoo kale Shabeellada hoose (degmada Wanle-Wayn - 4,700SoSh/kg). Taas waxaa cagsigeeda ah, qiimaha masagada ugu sareeya (8,000-10,000SoSh/kg) oo ka jirta Gedo (Luuq, Baardheere) iyo Bakool (Xuddur). Bilaha soo socda, qiimaha masagada iyo galayda waxay u egtahay in ay sii dhici doonaan Shabeellada hoose, Baay iyo dhulka wabiga ah ee Jubbooyinka sababtoo ah suuqa ayaa la qiyaasayaa in ay soo gaaraan gallay iyo masago badan waqtiga Deyrta '09 ka danbeeya. Taasi waxaan la mid ahayn in qiimaha badarku laga yaaboa in uu kor u kaco meelaha hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqatada ee Jubbada hoose, Hiiraan, Gedo, Bakool iyo qaybo ka mid ah gobolka Shabeelada dhexe sababtuna ay tahay kaydka badarka oo ku yaraa marka laga soo bilaabo xilligii Gugii, 09, xannibaad suuqyada ku timid iyo isugudubka ganacsiga ee gobolada oo xayirmay ayna keentay ammaan darrada. FSNAU waxay si hoose u fiirinaysaa sida helitaanka badarka iyo qiimaha uu joogo ee suuqyada waawayn bilaha soo socda.

***Fursada Shaqo Hellida***

Roobabka fiican ee da'ay iyo soo koboca dalagga ayaa waxay kordhiyeen daqli maalmeedka soo galaya xoogsatada saboolka ah inta badan koonfurta Soomaaliya. FSNAU waxay filaysaa meertada wax soosaarka beeraha ee xilligan in ay sii sahli doono fursadaha shaqo oo sii socoto (tusaale, beero abuurida Dhesheega Jubbada hoose, haramaynta (falista) koowaad iyo mida labaad, shimbiro ka ilaalinta dalagga taagan iyo dallag gurashada) bilaha soo socda ee gobolada Jubbooyinka, Shabeellooyinka, Baay, Gedo iyo Hiiraan. Waxaa cajiib ah, roobabkii waawaynaa iyo daadadkii bishii 10aad '09 xitaa waxay si macno weyn ah u kordhiyeen shaqo doonashada, iyo sidoo kale qiimaha beero abuuridda iyo abuurka dhulka wabiyada iyo hab-nololeedyada beero-xoolo dhaqato ee koonfurta Soomaaliya. Dhaqdhaqaaqa xooga leh waxuu kordhiyay qiimaha mushaar maalmeedka  ee lagu shaqeeyo dhulka intiisa badan marka laga reebo meelaha colaaduhu ka jiraan ee Jubbooyinka. Mashruuca shaqo ku badalasha lacagta ee hagaaajinta kanaalada waraabka ee gobolka shabeelada hoose ayaa waxaa laga helay fursado shaqo qaasatan dadka saboolka ah taasina waxay wax tari doontaa wax-soosaarka dalagga dhuka wabiyada u dhaw.

**Jaantuska 3: Isbedbedelka Iskubeddelashada Badeecooyinka, Badar ku Beddelasho Dakhli Shaqo maalmeed Heer Gobol.**




***Iswaydaarsiga Badeecadaha***

Iswaydaarsiga ka dhaxeeya badarka iyo shaqada dhulka gallayda laga soo saaro ee wabiyada Shabeele iyo Jubba waxaa lagu arkay in ay ka soo raynayso inta lagu jiray bisha 11aad '09 marka loo fiirsho bishii 7aad ee isla sannadkan.Soo rayntu waxay ka timid soo saarka badarka oo fiicnaa xilliga Gu '09 iyo iyadoo la filaayay Deyr wax soo saarkeedu caadi yahay '09/10; taasi waxay horseedday hoos u dhaca qiimaha badarka iyo in ay kor u qaado qiimaha mushaar maalmeedka xoogsatada. Tilmaan ahaan, laga soo bilaabo bidhii 7aad ee la soo dhaafay, is-waydaarsiga u dhaxeeya gallayda iyo shaqo maalmeedyada waa ay labalaabantay gobolada Shabeellooyinka. Gobolada Jubbooyinkana, isku darka iswaydaarsiga (gallay shaqo ku bedelashada) ee kordhay waxuu u dhigmaa ilaa 5%, inkastoo qiimaha gallaydu si macquul ah hoos ugu dhacay suuqyada muhiimka ah ee dhulka wabiyada.

Si kastaba ha ahaatee, is-waydaarsiga badeecadaha ee dhulka wax soosaarka masagada waxaa uu na tusayaa sawir isku dhafan oo tusinaya kala duwanaanshaha suuqyada waawayn ee dhulka masagadu ka baxdo. Is-waydaarsiga badeecadaha intii u dhaxeysay bilihii 7aad iyo 11aad ee '09 waxuu hoos u dhacay ilaa 20-40% suuqyada inta badan (Gedo, Bakool, Hiiraan) sababtana ay tahay qiimaha masagada oo sare u kacay oo ay la socoto wax-soosaarkii dalaggii Gu'ga '09 oo xumaaday. Si kastaba ha ahaatee, gobolka Baay badeco iswaydaarsiga waxuu muujiyay koror dhan 61% oo laga diiwaan geliyay suuqa Baydhabo. Ayadoo ay ugu wacan ka duwanaansho isku-beddelka badeecooyinka suuqyada kale ee dhulka massagada ka baxdo, isku darka dhamaan suuqyada dhulka masagada laga soosaaro (marka lagu daro Baay) ee bisha 11aad ee'09 waxuu muujinayaa hoos u dhac 5% kali ah laga soo bilaabo bishii 7aad ee'09. Is-waydaarsiga badeecooyinka ee ugu sareeya (badar/shaqo) intii lagu jiray bishii 11aad waxaa laga soo qoray dhulka wax-soosaarka gallayda ee Jammaame ee gobolka Jubbada hoose (32kg lagu beddesho hal mushaar shaqo maalin) iyo Qoryooley ee Shabeelada hoose (27kg/mushaar shaqo maalin). Gobolka Baay oo wax-soosaarka masaggadu ay fiicnayd, Qansaxdheere iyo Baydhaba (23kg iyo 18kg/mushaar maalin shaqo), xitaa waxaa laga soo sheegay isku badalasho badeeco sarreysa. Guud ahaan, ganacsi is-waydaarsiga bishii 11aad ee '09 waa 58% iyo 35% oo uu ka sarreeyo 5-sanno celceliskeed gobolada Shabeellooyinka iyo Jubba, siday isgu xigaan, meesha ay dhulka wax-soosaarka masaggada ay ka tahay in ka hoosaysa 10% (Sawirka 3).

## XOOLAHA

***Xaaladda Daaqa iyo Biyaha***

Markii ay roobabakii Dayrtu si fiican u da'een ayaa waxaa si fiican u soo hagaagay dhulkii daaqsinta ahaa ee waqooyiga, marka lagu daro Hawdka, dooxada Nugaal, inta badan dhulka soolka ah iyo hab-nololeedka Guban. Xogaha ka imaanaya dhulkaasi waxay sheegayaan dhulkii biyo qabatinka lahaa waxaa buuxsamay biyo badan roobkiina waa uu istaagay, taas oo horseedday in qiimihii biyuhu ay hoos u dhacaan. Xoolalaydu ma arooriso xoolaha sababtoo ah biyo ayaa meel walba iska yaalla. Taas waxaa ka duwan, xaaladda daaqa qaybta galbeed ee dhulka Soolka ah ayaa aad u xun (qaasatan Ceerigaabo, Ceelafwayn iyo Taleex), iyo sidoo kale Nugaasha kore ee  (Caynabo, Ceelafwayn iyo qaybaha galbeed ee degmada Xudun), buuraha golis iyo dhulka bannaan ee u dhow, Hawdka Hargeysa, dhulka xeebta ah ee gobollada Bari iyo Nugaal, Hawd iyo cadduun (degmada Jarriiban) ee waqooyiga Mudug. Dhulka biyo qabatinka leh iyo Berkaduhu ma wada buuxaan qiimuhuna waa sii kordhayey Ilaa iyo bishii 11aad. Daaqa iyo biyuhuba kuma filna xoolaha inta xilliga Jilaalka laga baxayo (bilaha 1aad illaa 3aad). Taasi waxay u keeni doontaa in biyo dhaamis hore loo bilaabo dhulka soolka iyo Nugaasha sare, Hawd iyo Cadduun (degmada Jarriiban) ee waqooyiga Mudug iyo sidoo kale Hawdka Hargeysa.



*Xaalada Daaq Xumo, Hawdka Galgaduud, Bishii 11aad'09.*

Xaaladda daaq iyo biyo ee ugu xun waxaa laga soo sheegay waqooyiga Galgaduud (Caabudwaaq, Dhuusamareeb iyo Cadaado) iyo sidoo kale Hiiraan (xoolalayda Hawdka, dhulka xoolalayda ah ee gudaha durugsan (geelleyda) ee koonfurta, iyo dhulka hab-nololeedka ee degmooyinka Jalalaqsi iyo Bulo-Berde) kuwaas oo soo maray lix xilli oo abaar ah. Si kastaba ha ahaatee, gobollada koonfureed ee Shabeellooyinka, Jubbooyinka, Bay/Bakool iyo Gedo daaqu gabi ahaan waa soo

xoolaha

fiicnaaday. Guud ahaan, xoolalayda koonfur Soomaaliya (lo'layda) waxay ku noqdeen hab-nololeedkoodii hore sababtana ay tahay ayadoo laga helayo daaq iyo biyo ku filan.

Ma jiro wax hayaan xoolaad ah oo laga arkay waqooyiga, inkastoo isu socodka Gobolada dhexdooda la soo sheegay oo laga soo guurayo meelihii roobku ku yaraa loona soo guurayo meelihii roobku ku badnaa ee Nugaasha sare iyo mida dhexe, bariga dhulka soolka ah iyo Hawdka sool, Nugaal Iyo Togdheer. Waxaa billowday hayaan xoolaad meelaha roobku ku yar yahay ee waqooyiga ilaa Golis Guban iyo hab-nololeedka xeebta Deexda si ay uga faa'idaystaan roobabka Xayska (dabayaaqda bisha 11aad illaa bisha labaad 33'10). Taa waxaa ka duwan, gobolada dhexe oo laga soo sheegayo hayaan xoolaad degmooyinka waqooyi ee gobolka Galgaduud xooluhuna ay u hayaamayaan dhulka soomalida ee Etoobiya, koonfurta Mudug iyo koonfurta galgaduud. Gobolka Hiiraan, lo' dhaqatadu waxay u hayaameen Shabeellada dhexe.



*Daaq aad u Wanaagsan, Gobolada Jubboyinka, Bishii 11aad '09.*

***Xaalada Jirka Xoolaha, Wax-soosaarka iyo Dhalmada***


Dhamaan hab-nololeedyada xoolalayda, xaalada jirka ee xooluhu waxay si toos ah ugu xiran tahay hadba xaaladda xilliga markaa la joogo. Gobolada Waqooyi galbeed, xaaladda jireed ee lo,da iyo idaha waa ay liidataa, qaasatan xoolaha irmaan iyo kuwa da'da ah. Waxaa muuqata in ay adagtahay in ay soo kabsadaan sababta oo ah daaqii oo markii uu soo baxaba ay xooluhu cunayaan oo badan awadeed. Taa waxaa dheer, ma laha wax-soosaar calafka xoolaha oo hadda jira, lo'duna hadda waxaa lagu quudiyaa gacanta ayadoo la siinayo bal dallag oo aan qaangaarin (bal), xaalada jirka ee geela xitaa waa liidataa sabatoo ah waxaa ku dhacay cudur looga shakiyay in uu yahay furuq. Si kastaba ha ahaatee, dhulka Soolka, bariga Sanaag, qaybo Bari iyo Nugaal ka mid ah, waqooyiga Mudug, koonfurta Galgaduud, Hiiraan, Shabeelada Dhexe, Bakool, Gedo iyo gobolada Jubbooyinka xooluhu waxay ka soo kabanayaan abaarihii is daba socday oo ay keneen xilliyadii roobabka ay liiteen. In ay soo kabtaan oo jirkooduna caadi ku soo noqdo waxaa keenay daaqa oo soo fiicnaaday iyo helidda calafka xoolaha meelaha qaarkood. Gobolada shabeelada Hoose, Baay, Jubbada Dhexe, kuwaas oo soo maray xilliyo fiican, jirka xooluhu waa fiican yahay.

Waqooyiga, wax-soosaarka iyo dhalidda xoolaha waa hoosaysaa sababtana waa rimayga xoolaha oo yaraa Jiilaalkii la soo dhaafay iyo Gugii '09, iyo sidoo kale cudur ku dhacay geela iyo ariga xilligii xagaaga '09 taas oo keentay dhimasho iyo in xooluhu dhiciyaan. Meelaha roobka celcelis ahaan roobab caadi ah helay, rimayga geela waxay ku bilaabatay caddad hooseeya, in kastoo la sugaayo dhalid (waylo/maqal) badan bisha 12aad ee '09. Tirada dhalida lo,da ee hab-nololeedyada bartamaha ee dhulka digirtu ka baxdo iyo beero-xoolo dhaqatada Hiiraan, iyo sida oo kale beero-xoolo dhaqatada waqooyi galbeed aad bay u hooseysaa sababtana waa abaaro soo baxaya iyo daaqa oo xun. Si kastaba ha ahaatee, inta badan gobolada koonfureed dhalmada xoolaha (waylaha/maqasha) waxay ku bilaabatay caddad hoose waana ay sii kordhi doontaa bisha 12aad ee'09. Tirada lo'da ee dhashay hab-nololeedka bartamaha ee dhulka digirtu ka baxdo iyo beero-xoolo dhaqatada Hiiraan, iyo sidoo kale beero-xoolo dhaqatada waqooyi galbeed aad bay u hooseysaa sababta oo ah abaaro soo baxaya iyo daaqa oo liita. Si kastaba ha ahaatee, Inta badan gobolada koonfureed dhalidda waxay ku bilowdeen caddad yar waana ay kordhayaan bisha 12aad ee'09 iyo bisha 1aad ee'10; marka laga reebo Bakool halkasoo rimida lo'da ay hooseyso abaar daraadeed. Soo-saarka caanaha iyo helitaankoodaba Soomaaliya oo dhan marka laga reebo waqooyiga Galgaduud iyo Hawdka Hiiraan in yar waa ay soo hagaagaysaa sababtana waa caanaha xoolaha laga liso oo korodhay meelaha ay dhalmadu ay hagaagtay ayna korodhay helidda biyaha Iyo calafka xoolaha.

***Ganacsiga Xoolaha, Qiimaha iyo Iswaydaarsiga Ganacsiga (TOT)***

Bishii la soo dhaafay, xoolaha qiimahoodu kor buu u kacay inta badan Soomaaliya marka laga reebo lo'da gobollada waqooyi bari iyo rida dibaaxa ee dhulka ay ka baxdo masagada, iyo sidoo kale qiimaha xoolaha ee gobolada dhexe. Qiimaha lo'da koonfurta iyo waqooyi galbeed waxay korodhay illaa 12-23%, halka waqooyi bari uu qiimuhu hoos u dhacay illaa 7%. Si kastaba ha ahaatee, marka loo eego illaa bishii 11aad sanaddii la soo dhaafay qiimaha lo'du waa ay hooseeyaa wali gobolada dhulka masagadu ka baxdo (42%), Shabeele (18%) iyo Jubbooyinka (30%). Qiimaha rida caadiga ah ee joogta waqooyi bari waxay korodhay illaa 1-9% bishii la soo dhaafay, laakiin waxay ka sareysaa 7-11% marka la barbardhigo bishii 11aad ee sanaddi '08. Qiimaha ariga la dhoofsho xitaa si yar bay u kordhay (illaa iyo 5%) bishii 11aad ee'09 dalabka xilliga Xajjka aawgii, suuqyada oo aan la keeneyn xoolo abaaraha iska soo daba noqonaya awadood, iyo sidoo kale ka qaadista cunaqabatayntii dhoofka xoolaha ee Sucuudiga (bishii 10aad ee'09). Iswaydaarsiga Ganacsiga (TOT) ee badarka ee lagu baddalanaayo rida daabaxa ah waa ay korodhay bishii la soo dhaafay Soomaaliya oo dhan, marka laga reebo bartamaha oo ay hoos u dhacay illaa 11% ilaa iyo bishii 10aad. Dhulka masaggadu ka baxdo, gobolada Shabeellooyinka iyo Jubba, inta korodhay iswaydaarsiga ganacsiga (badar lagu badalanaayo neef lo' ah) waxay u dhigantaa laa 14%, 29% iyo 21%, siday isugu xig xigaan (Sawir 4).

**Jaantuska 4: Isbedbedelka Heer Gobol ee Qiiimaha Ariga Daabaxa**





Qaadista xannibaaddii xoolo dhoofinta waxay keentay in ay si xawli ah u korodho dhoofinta xoolaha ee dekadaha Booosaso iyo Berbera bishii 11aad kadib markii ay aad hoos ugu dhaceen (47%) inta u dhaxaysay bishii 8aad illaa iyo tobnaad '09. Kororka xoolaha la dhoofshay waxay u dhigmaan illaa 484% (laga billaabo 71,520 ilaa 346,146 neef) Boosaaso iyo 998% (laga bilaabo 80,356 ilaa 801,886 neef) Berbera. Waxaa taa cagsi ku ah, guriga xoolaha lagu qalo ee Burco lagama dhoofin hilib labadii bilood ee la soo dhaafay (bilihii 10aad iyo 11aad) heshiiskii ay la galeen Imaaraadka Carabta (UAE) oo ka dhamaaday awgeed. Si kastaba ha ahaatee, guriga xoolaha lagu qalo ee Gaalkacyo waxuu dhoofiyay 2,500 neef oo hilib ah bishii 10aad ee'09 taas oo la mid ah tiradii bishii 9aad'09 la dhoofiyay laakiin wali 37% ayay ka hoosaysaa tiradii la dhoofiyay bishii 8aad ee '09.

xoolaha

## SUUQYADA IYO GANACSIGA


Qaybtii sanadka ugu horeysay, Shillinka Soomaaliga (SoSh) waa sabaynayay marka loo eego Doollarka Maraykanka (USD) asagoo uu shillinka qeymihiisu kor u kacay celcelis ahaan 8% inta u dhexeysay bilihii 1aad iyo 3add ee ‘09 iyo asagoo hoos u dhacay mar labaad bilihii 4aad illaa 7aad ee ‘09 (3%). Si kastaba ha ahaatee, qaybta kale ee sannadka Shilinka Soomaaligu waxuu billaabay in uu soo fiicnaado haddana bishii 11aad ‘09 waxaa uu gaaray qiimahiisa 4-8% inta badan suuqyada. Si kastaba, suuqa wayn ee Bakaaraha ee Muqdisho ku yaala, halka Doollar waxaa lagula kala wareegayay SoSh 31,840 bisha 11aad ‘09, taas u dhaw koror ah 5% qiimihiisa illaa bishii 7aad ee 09. Qiimaha hadda ee Shilinka Soomaaliga marka la fiirsho suuqyada kala duwan waxa uu ka kor-reeyaa 2-8% marka loo barbar dhigo heerkiisii bishii 11aad ee sanadkii la soo dhaafay. Si kastaba ha ahaatee, heerka qiima dhaca Shilinka Soomaaliga waa uu sareeyaa wali marka loo eego celceliska 5-sanno (2003-2007), baaxad u dhaxaysa 80-90% inta badan suuqyada koonfurta Soomaliya (Sawir 5).

**Jaantuska 5: Isbedbedelka Qiimaha Sarrifka Lacagaha SoSh iyo SlSh oo Lagu Beddelanayo USD.**




Shillinka Soomaalilandka (SlSh) waxuu lumiyay qiimihiisii 11% sanadka qaybtiisii hore laaakiin waa uu ka soo kabsaday intii lagu jiray bilihii 7aad iyo 8aad ee ‘09.  Kadib markii qiima dhac ku dhacay labadaan bilood ee 9aad iyo 10aad ee ‘09) haddana kor buu u kacay bisha 1aad’09 oo waxuu ka gaaray suuqa Hargeysa 6,400 SlSh/USD, waxayna u dhigantaa amaba la mid tahay celceliska 5-sanno ah (2003-2007). Ka soo raynta Shilinka Soomaaliga (SoSh) iyo Shilinka Soomaliland-ka (SlSh) waxaa keenay xilligii Xajjka oo xoolo badan la dhoofiyay.

**Jaantuska 6: Isbedbedelka Heer Gobo lee Qiimaha Bariiska Guduudan ee la soo Dhoofiyo.**




***Qiimaha Badeecada la soo Dejiyo***

Imaanshaha iyo suuqgeynta badeecadaha dibadda laga soo dejiyo waa ay koro-dhay ilaa iyo markii laga soo xog bixiyay (bilihii 7aad iyo 8aad ee’09) sababtana ay tahay inay dhamaadeen dabaylihii maansoonka. sidaas daraadeed, qiimaha badecadaha soo dega siday u badan yihiin, waxaa ka mid ah bariiska guduudan, sonkorta, saliid caddeyda, iyo shidaalka, waxaanad u malaysaa in ay wali wax yar deggan yihiin inta badan suuqyada laga isticmaalo Shillinka Soomaliga. Marka laga reebo gobollada Shabeellooyinka iyo dhulka Shilinka Somaliland-ka laga isticmaalo halkaas oo qiimaha saliid caddayda ay kor u kacday illaa 17% labadii bilood ee ugu danbeeyey in kastoo qiimihii ugu sarreeyay badeecaddan laga qorey gobolada dhexe. Isla xilliyadan, waxaa qiime hoose laga soo qoray Waqooyiga galbeedsida Sonkorta (10%), patroolka (10% midkiiba) iyo bariiska (14%), kadib markay u kordheen heer dhex dhexaad ah bilihii 7aad iyo 8aad ee’09 (arag FSNAU xogta kooban ee saddexbiloodlaha ah Nof. ‘09).

Guud ahaan, qiimaha badeecadaha ee dhulka Shillin Soomaaliga laga isticmaalo oo dhan waa ay sarreeyaan (107-235%) marka loo eego bisha 11aad heerkeeda celcelis ee 5-sanno. Meelaha laga isticmaalo shillinka Somliland-ka ayaduna waa sidoo kale (20-80%), iyadoo qiimaha bariiska uu muujinayo kororka ugu sar-reeya ee boqolkiiba (Sawir 6). Waxaa la filayaa in qiimaha badeecadaha la soo degiyo ay in yar hoos u dhici doonaan bilaha soo socda maadaama xaddiga la soo deginaayo ay badan doonto sababtana ay tahay kororka xoolaha la dhoofinayo oo sii kordhi doona taas oo ay keenayso qaadista xannibaadda dhoofinta xoolaha ee wadanka sacuudiga (arag qaybta xoolaha).

## XAALADA NAFAQO

Bilihii Oktoobar iyo Nofeembar FSNAU iyo hay’adaha ay wada shaqeeyaan, waxay ka sameeyeen 9 sahan oo nafaqada la xiriira gobolada Togdheer, Mudug, Galgaduud iyo Hiiraan. Natiijooyinka sahamadan ayaa tilmaamaya dhibaato nafaqo darro daba dheeraatay in ay ka jirto gobolada dhexe iyo Hiiraan halka xaalad laga walwalo oo dhibaato badan aynan ka jirin gobolka Togdheer.  Gobolada dhexe waxaa laga sameeyay 4 sahan oo matalaya 2 hab-nololeed iyo 2 gobol, ayadoo lagu saleeyay jaangooayada korrriinka caruurta  ee WHO (2006), dhamaantoodana waxay tusayeen heerar isku mid ah. Sahamadan oo lagu saleeyay hab-nololeedyada ayaa waxay muujiyeen natiijooyin ah 20.2% (15.6-24.7) Heerka Nafaqo Darrida Guud (GAM) iyo 4.6% (2.8-6.3) Heerka Nafaqa Darrada Halista ah (NDH) ayaa laga soo sheegay hab-nololeedka Cadduun iyo 19.1% (15.3-23) NDD iyo 4.3% (2.7-5.9) oo ah Nafaqo Darrada Halista ah NDH inay ka jirto hab-nololeedka Hawd. Sahannada ku salaysan gobollada natiijadoodu waxay muujisay 19.4% (14.5-24.3) oo heerka Nafaqo Darrida Guud ah  NDG iyo 5.5% (3-7.9) oo heerka Nafaqo Darrida Ba’an NDB ah in ay ka jirto gobolka Galgaduud halka 22.3% (17.6-27) ee heerka Nafaqo Darrida Guud NDG iyo 6.1% (4.1-8.1) Nafaqo Darrida Halista ah NDH laga soo sheegay gobolka Mudug. Tirada dhimashadu waxay waafaqsanayd heerka xogta asaasiga ee laga cabbir qaato, marka laga reebo sahankii laga sameeyey Hawdka halkaasoo labada tiraba ay u dhawaadeen heerka feejignaanta.

Natiijooyinkaasi waxay ifinayaan dhibaatada dabadheeraatay ee gobolada dhexe waxayna tilmaamayaan in aysan xaaladdu ka soo raynin xaaladdii xilligii Guga ee lix bilood ka hor. Dhibaatadaan dabadheeraatay waxaa kale oo laga ogaaday xarumaha quudinta ay wadaan hay,adaha caalamiga ee gobolka, halkaasoo ay tiro sii kordhayso oo caruur nafaqadaran ilaga diiwaan geliyo. Ayadoo saadaalo xun laga sii bixinayo xaaladda sugnaanta cunnada ee gobolka, dhamaan dadaallada lagu  hubinayo gaarsiin aan kal go lahayn oo lagu badbaadinyo nolosha dadka sida gargaar cunto, adeegyo dib loogu hagaajiyo heerarka nafaqada, caafimaadka biyaha,, iyo taageero degdeg ah oo wax looga qabanayo hab-nololeedaya ayaa waxay yihiin kuwo loo baahan yahay si looga hortago inay xaaladda ka sii darto.

Gobolka Hiiraan sidoo kale waxuu ku jiraa xaalad nafaqa daro ba'an oo joogtowday ee nafaqa darida guud NDG, sedexda sahan nafaqo way ka sareyeen 20% wax farqi aha uma dhexeyn hab nololeedyada, kuwa wabiga ku dhinac nool waxay ahayd > 20% ee NDH iyo >4% ee NDH nafaqa darada ba'an, daka xoolo dhaqatada la sahanshey waxa ay muujisay natiijada 21.2% (16.5-25.8) ee heerka nafaqa darida guud NDG, iyo 5.3% (3.1-7.6) heerka nafaqa darida ba'an, NDH. halka sahanka beera-xoolaleyda natiijada noqotay 23.4% (19-27.8 ) ee heerka NDG iyo 7.4% (3.9-10.9) ee heerka NDB, heerka dhimashadana ka baxsanayn heer xogta assaasiga, si kastaba ha ahaatee sida gobolada dhexe hey'adaha samafalka ee gobolka waxa ay ku warbixiyeen Iney kardheyso caruuta laga diiwaan geliyo xaruumaha quudinta, sidey ahaataba waxaa jira In warbixinta muujisay Iney ka sii dareyaan heerarka ba'an ee nafaqa darida hab nololeedka dadka wabiyada Iyo xoolo dhaqatada, tani waxa ay mar kale hoosta ka xariiqysaa baahida joogteynta gargaarka aadamenimo ee Hiiraan si loo daboolo baahida,

Ugu danbayntii xoogaa ka soo reyn ah ayaa laga ogaaday gobolka Togdheer ee waqooyi galbeed. Inkastoo sahan deegaanka wada matala aan laga samayn intii lagu jiray Gu '09, falanqaynta isku dhafka ah waxay tilmaamaysaa xaalad nafaqo oo *heer aad u xun* dadwaynaha beero-xoolo dhaqatada ah arintan oo lagu saleeyey macluumaad qiimeyn deg deg ah Iyo xog laga soo ururshay iyo xarumaha caafimadka, si kastaba ha ahaatee, xogta sahankii dhowaa waxay soo sheegtay xaalad ***heer xun*** oo noqotay 16.1% (13.1-19.1) NDG iyo 2.9% (1.5-4.4) NDH. Intii lagu jiray Guga, ilmo aad u badan ayaa la ogaaday in ay hayso nafaqadarada mar dhow ku habsatay oo ay weheliso shuban faafay oo aad xun yo cuduro guud oo meesha isaga batay. Hadda dhacdoyin sidaa u baahsan lagama soo sheegin, taas oo sabab u ah in xaalada ay soo hagaagayso, si kastaba ha ahaatee, waa laga sii walaacsan yahay waana in dadaal loo galaa sidii dadwaynaha nafaqadarada kal dhow soo ridatey rafaq celin loo siin lahaa. Dadwaynaha xoolalayda reer Togdheer waxaa lagu sifeeyey Iney ku jaraan heerka nafaqadarida xun, Sahanka nafaqo ee mar dhow laga sameeyey waxaa lagu war bixiyey heerka NDG oo ah 10.1% (7.7-13.2) iyo heerka NDH oo ah 1% (0.4-2.4). Tirada dhimashadu labada baarisba waa ka hooseeysaa heerka digniinta (Sawir 7). Falanqeyn dhameystiran ayaa la sameyn doonaa lagana soo doonaa warbixin dhameystrin dish |Disember09,

**Jaantuska 7: Heerka Dhimadasha Dadka ee laga soo Sheegay Daraasadihii Gobollada Dhexe, Hiiraan iyo Waqooyi Galbeed**


| *Goobta* | *HDHG* | *HDH<5S* |
|---|---|---|
| *Addun* | *0.61* | *0.93* |
| *Hawd* | ***0.9*** | ***2.0*** |
| *Galgadud* | *0.78* | *1.61* |
| *Mudug* | *0.35* | *0.85* |
| *Hiran Pastoral* | *0.5* | *0.82* |
| *Hiran A/pastoral* | *0.54* | *0.84* |
| *Togdheer Pastoral* | *0.71* | *0.98* |
| *Togdheer A/pastoral* | *0.59* | *1.13* |

*Xadadka Feejignaanta:*
*Heerka Dhimashada Guud: 1/10/000/day*
*Heerka Dhimashada 5 Sano Jlr ka Yar: 2/10,000/day*
*Xadadka Xaalado Deg-Deg:*
*Heerka Dhimashada Guud: 2/10/000/day*
*Heerka Dhimashada 5 Sano Jlr ka Yar: 4/10,000/day*

## FALANQAYNTA BAAHSAN EE HUBINTA CUNTADA

Waxaa jira caalamado muujinaya in ay soo hagaagayso guud ahaan xaalada sugnaanta cuntada inta badan hab-nololeedyada Soomaaliya, sababtana ay tahay dalagga oo xaaladdiisu wanaagsan tahay, xaalada daaqa oo fican iyo helitaanka biyaha oo soo hagaagay ayna raacday roobabkii Deyrta oo dhex dhexaad iyo waxii ka sareeya noqday. Xaaladahaasi ayaa waxay keeneen in ay hagaagto xaaladda jirka ee xoolaha, inay korodho xoolaha suuqa loo iib geeyo iyo sidoo kale qiimaha xoolaha oo wanaagsanaaday. Xitaa qiimaha badarka hoos buu u dhacay suuqyada muhiimka ah ee koonfurta Soomaaliya. Fursadaha shaqo helis ayaa iyana hagaagtay, sidoo kalena isku-bedelashada badeecadaha iyo awoodda wax iibsi ee inta badan hab-nololeedyada. Marka laga reebo Hawdka Hiiraan, Galgaduud, Mudug, iyo hargeysa, qaybo ka mid ah beero-xoolo dhaqatada waqooyi galbeed, yio sidoo kale Cadduun iyo banka Sool (khaasatan qaybta galbeed) taas oo soo martay xaalad roob yari oo wax u dhintay daaqii iyo biyo heliddaba, iyo sidoo kale in dalaggu uu kobco.

**Jaantuska 8: Iskubeddelashada Badeecooyinka ee Daqli Shaqo Maalmeed lagu Beddelanayo Gallay (1kg) - Jammaame.**





***Gobolada Koonfurta (Shabeellada Hoose, Shabeellada Dhexe, Baay, Bakool, Gedo, Jubbada Hoose, iyo Jubbada Dhexe)***

Gobolada koonfurta waxay soo mareen xaalado ay sugnaanta cuntadu hagaagtey intii lagu jiray xilligii Guga '09 ayna hoos u dhacday 9% tirada dadka dhibaatay-san (543,000 oo qof) ilaa iyo xilligii Deyrtii hore ee '08/09 (eeg buuga taxanaha ee baarista Guga 2009 ka dib). Xilliga Deyrta hadda lagu jiro, xaaladda sugnaanta cuntada ee hab-nololeedyada miyiga ee koonfurta waa uu sii hagaagayaa, maadaama fursadaha shaqo helistu ay kordhayaan ayna ugu wacan tahay dalagga baxay Deyrta iyo sidoo kale miro gurashada dalagga xilli beereedka ka baxsan oo heer caadi ah.

Xaalada daaqa iyo daaqsinta waa ay ficnaadeen, iyo sidoo kale xaalada jirka xoolaha, wa-soosaarka iyo dhalmada xoolaha xitaa waa ay soo hagaagtay. Soosaarka caanaha iyo heliddooduna waa ay soo hagaagtay si tartiib tartiib ah dhulka intiisa badan marka laga reebo gobolka Bakool (eeg qaybta xoolaha). Qiimaha badarka hoos buu u dhacay, halka ay qiimaha xooluhuna kor u kaceen. Qodobadaas aan kor ku soo sheegnay waxay hagaajiyeen iswaydaarsiga ama isdhaafsashada

badeecooyinka (shaqada iyo badarka; xolaha iyo badarka) iyo awoodda wax iibsiga ee dadka. Arintan kordhitaanka ee iwaydaarsiga ganacsiga waxaa lagu arkay gobollada Baay, Bakool, Gedo, Shabeellooyinka iyo Jubbooyinka. Dhamaan arrimahan aan kor ku soo xusnay iyo sidoo kale Deyrta '09/10 oo u wanaagsanayd bixidda dallaga, waxay sare u qaadday filashada in sugnaanta cuntadu ay sii hagaagi doonto iyo in tirada dadka dhibaataysanna ay hoos u dhici doonto 6da bilood ee soo socota inta badan hab-nololeedyada gobollada koonfureed ee Soomaaliya, marka laga reebo hab-nololeedka beero-xoolo dhaqatada ku sugan waqooyiga gobolka Bakool.

**Jaantuska 9: Iskubeddelashada Badeecooyinka ee Daqli Shaqo Maalmeed lagu Beddelanayo Bariis (1kg) – Gobollada Dhexe**





***Gobolada dhexe (Mudug, Galgaduud iyo Hiiraan)***

Xaaladda sugnaanta cuntada iyo nafaqaduba waa ay sii xumaannayeen illaa Gugii '07, sabatana ay tahay xilliyada oo sii xummaanayay, barakacayaal badan oo gobolka ku sugnaa, colaado sokeeye, dhaqdhaaq xumo suuq, sicir barar iyo qiimaha firileyda oo sareeyay. Gobolada dhexe waxaa wax yeelleeyay shan xilli oo isxiga oo roob la'aan ah, taas oo keentay in ay aad hoos ugu dhacdo hantida iyo nolosha hab-nololeedyada, kuna qasabtay qoysaska in ay la qabsadaan walwalka rafaad ku noolaanshaha oo ah in ay badbaadaan meelaha ay deggan yihiin amaba ay u hayaamaan tuulooyinka iyo magaalooyinka waaweyn ayagoo cayr ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga arkay wax yar oo soo hagaag ah gobollada dhexe sababtana ay tahay roobabka Deyrta '09/10 oo celcelis ahaaan iska dhex dhexaad ahaa, kaas oo hagaajiyay dhulkii daaqa iyo xaaladda biyaha. Taasi waxay keentay in uu soo fiicnaado jirka xoolaha, xoolahaas oo lagu iibinayey qiime sarreeya inta u dhaxaysay bilihii 7aad iyo 11aad '09 (Inkastoo ay jirtay in yar oo qiima dhac ah labadii bilood oo ugu danbeeyay). Isla markaasna, qiimaha bariisku hoos buu u dhacay (eeg qaybta xogta suuqyada) Intii lagu jiray bilihii 7aad illaa 11aad ee '09, taas oo hagaajisay badeeco isku-beddelashada u dhaxeeya neefka ariga ee daabaxa ah iyo bariiska iyo sidoo kale isku-beddelashada dakhliga shaqo maalmeedka iyo badarka (Sawirka 9).

Taas waxaa dheer, xaaladda dalagga la qaybo Hiiraan ka mid ah iyo dhulka digirtu ka baxdo ee Galgaduud iyo Mudug waxay u dhow yihiin heer dhex dhexaad ah, taas oo kordhinaysa fursada shaqo helis, sida harameynta, waraabinta, iwm. Meelaha sidaa ka duwan waa hab-nololeedyada Hawd iyo qaybo ka mid ah Cadduin, meelahaasoo roobka Deyrta oo yaraa uu keenay in xooluhu u hayaamaan hab-nololeedyada la deriska ah, qoysaska oo is qaybi-yay iyo daaqii iyo biyihii yaraa oo la wada isticmaalay. Si kastaba ha ahaatee, iyadoon la eegayn sida Deyrta '09/10 u da'day iyo qiimaha xoolaha iyo badarku sida uu u socdo, dadwaynuhu kama soo kaban karayaan dhibaatada xilligaan taagan marka la eego daba dheeraanta iyo xumaanta aadka ah ee abaarta. Soo kabashada hanti ee hab-nololeedyada waxay qaadanaysaa dhowr xill oo caadi ah oo isku xig xiga.


**Jaantuska 10: Celceliska Qiimaha Bishiiba ee Ariga Daabaxa ee Waqooyi Bari**




***Gobolada Waqooyi***

Intii lagu jiray baarista ka dambaysay Gugii '09, waxaa la qiyaasay illaa 280,000 qof oo ku sugan gobolada waqooyi in ay ku sugnaayeen dhibaato heer liidata ah sababtoo ah xaaladaha sugnaanta cuntada iyo nafaqada oo ka sii daraya hab-nololeedyada xoolo-dhaqatada iyo beero-xoolo dhaqatada. Xilliga Deyrta hadda waxaa muuqda caalamado in arrinku ka soo raynayo inta badan waqooy-iga sababtuna ay tahay waxaa la helay roobab celcelis ahaan caadi ah ama ka sareeya heerka celceliska, kuwaas oo sare u qaaday helidda biyaha, xaaladda daaqa, iyo xaaladda jirka xoolaha meelaha hab-nololeedyada xoolalayda waxayna hagaajiyeen sida xaaladda dalagbixista (koboca iyo bixidda dalagga ) ee qaybo ka mid ah goobaha beero-xoolo dhaqatada (Awdal, W. galbeed). Qodobada kale ee keenay inay xaaladuhu hagaagaan ayaa waxaa ka mid ah koror xagga dhaqdhaqaaqa ganacsiga xoolaha iyo qiimaha xoolaha ayna sababtay dalabka xoolaha oo kordhay xilligii xajka lagu jiray iyo xayiraaddii dhoofka xoolaha oo ay ka qaadday dawladda Sacuudi Careebiya; hoos u dhac ku yimi qiimaha badarka (masaggada, galleyda iyo bariiska); fursadaha shaqo helista iyo qiimaha mushaarada hawl maalmeedka oo soo hagaagay intii lagu guda jiray xilligii Gu/Karan markii miraha la goosanayay; waxaa taas raacda iku-bedelashada badeecadaha oo ayana hagaagtay (Sawir 10 Iyo 11).

**Jaantuska 11: Celceliska Qiimaha Bishiiba ee Ariga Daabaxa ee Waqooyi Galbeed**




Taas waxaa liddigeeda ah, roobabka Deyrta oo xumaa oo ay dheereyd xagaagii ka horreeyey oo qalalnaa ayaa waxay waxyeello u gaysteen hab-nololeedyada xoolalayda Mudug, Nugaal iyo gobolka Waqooyi Galbeed, iyo sidoo kale qaybo ka mid ah Cadduun, banka Soolka (qaybtiisa galbeed) iyo meelaha beero-xoolo dhaqatada ee waqooyi. Taas waxay xoolaha ku kaliftay in ay u hayaamaan hab-nololeedyada deriska la ah ee roobabka uu celcelis-koodu caadi ahaa amaba caadi ka sarreeyay. Roobabka Xayska ah ee ka bilowday hab-nololeedyada Golis iyo Guban iyo xeebta deexda ee gobolka Bari ayaa laga yaabaa in ay soo jiitaan xoolo badan oo uga imaanaya gobolada deriska la ah, taas oo keeni karta in uu daaqa si degdeg ah uga dhamaado meelahaas. Marka la eego sii hagaagga xaaladaha daaqa iyo biyaha, iyo kororka dhoofka xoolaha, sugnaanta cuntada ayaa la filayaa in ay sii hormarto qaybo ka mid ah waqooyiga marka laga reebo meelaha roobabka Deyrtu ay ka hooseeyeen heerka caadiga ah.

**Daabacaadaha iyo Warsaxaafeedyada Soo Baxay amaba Soo Bixi Doona**

*FSNAU/FEWSNET Xogta Cusub oo Suuqyada, November 2009*
*FSNAU/FEWSNET Xogtii Ugu Dambaysay ee Cimilada, November 2009*
*FSNAU Taxanaha Warbixinta Farsamo ee Xaaladda Nafaqada, September 2009*
*FSNAU Taxanaha Warbixinta Farsamo ee ka Dambaysa Falanqaynta Guga '09, September 2009*

*XUSID: Daabcacadaha iyo Warsaxaafadeedyada Dusha Ku Qoran waxaa laga heli karaa website-ka FSNAU ee www.fsnau.org*

Technical & Managerial Support

European Commision

Funding Agencies